Press Release

La xidhiidh: Perry Cooper | SEA Airport
(206) 787-4923 | Cooper.p@portseattle.org

# Ururada Ismaamulka South King si loo Helo Ku Dhawaad $1.5 Milyan Maalgalinta Deeqda Dekada

*Lix ka faa'idayste ayaa isticmaali doona maalgalinta lagu kordhinayo fursadaha maaliyadeed ee magaalooyinka u dhaw madaarada*

**SEATTLE** – Ururo badan oo degmada South King ah (lix wadar ahaan) ayaa lagu wadaa inay helaan ku dhawaad $1.5 milyan wareeggii afraad ee maalgelinta Dekedda Seattle Maalgalinta Saamaynta Bulshada Ismaamulka South King (SKCCIF) Barnaamijka Soo Kabashada Dhaqaalaha. Ku dhawaaqida maanta, Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaale waxa uu geliyey $6,674,591 34 mashruuc oo ay hogaaminayaan 26 urur oo aan faa'iido doon ahayn iyo kuwa bulshada ka yimid. Maalgalintu waxay caawisaa kordhinta fursadaha dhaqaale ee magaalooyinka ku wareegsan Madaarka Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA).

Barnaamijka soo kabashada dhaqaalaha ayaa la bilaabay 2020 si looga caawiyo soo kabashada xanuunkii safmarka ahaa. Iyadoo loo marayo wadashaqaynta ku dhisan sinaanta, barnaamijyada maalgalintu waxay taageerayaan in la balaadhiyo fursadaha shaqooyinka mushaharka fiican lagu bixiyo iyo tababarada, iyo shaqaalaysiinta jiilka xiga ee dhinacyada dekadaha la xidhiidha sida duulista iyo hawada, dhinaca arrimaha badda, dhismaha, iyo xalinta waxyaabaha cagaaran.

"Intii lagu jiray xanuunkii COVID-19, waxaan xaqiiqsanay baahi degdeg ah oo lagu taageerayo bulshadeenna iyadoo loo marayo maalgalin la beegsanayo si loo horumariyo dariiqyada deganaanta, gaar ahaan kuwa ugu baahida badan," **waxa sidaa sheegay Komishaneerka Dekada Seattle Sam Cho.** "Hirgelinta barnaamijka soo kabashada dhaqaalaha ayaa muhiim u ah bixinta kheyraadkan muhiimka ah. Ka go'naanshaheenu wuxuu ka balaadhan yahay taageerada maaliyadeed. Waxa naga go'an inaan xoojino shaqaalaha ka shaqaynaya shaqooyinka kajira Dekada iyo inaan dejino bulshadeenna. Waxaan sii wadi doonaa la shaqaynta ururada iyo shaqsiyaadka ka faa'idaysanaya barnaamijyadan muhiimka ah."

**Fudadaynta dariiqooyinka shaqo**

Xidhiidhka aan la leenahay dhammaan qaybaha dhaqaalaha ee muhiimka ah ee Washington iyo xidhiidhka in ka badan 500 oo loo-shaqeeyayaal ah oo ka hawlgala

guud ahaan xarumaha, Dekeddu waxay si gaar ah u taagan tahay inay ku xidho bulshooyinka ay sida aadka ah u saameeyaan hawlaha Dekada iyo xirfadaha warshadaha. Mashaariicaha bulshada lagu hogaaminayo waxay ka caawisaa ka qeybgalayashu inay helaan xirfado, khibrad, iyo waxbarashada ay u baahan yihiin si ay u kordhaan shaqooyinka laga qabanayo Dekada iyo qaybaha kale ee la xidhiidha dekada. Maalgalinaha horumarinta shaqooyinka waxay muhiimad gaar ah u leeyihiin hadda sababtoo ah hawlaha dekada la xidhiidha waxay sii wadaan inay khibrad siiyaan shaqaalaha.

“International Rescue Committee (IRC) ee ku sugan Seattle waxay doonaysaa inay bilawdo barnaamijka Dariiqa Xirfadaha Gaadiidka (TCP) iyadoo loo marayo Sanduuqa Maalgalinta Bulshada ee Ismaamulka South King County,” **waxa sidaa sheegay Agaasimaha Fulinta IRC Kathleen Morris.** “Barnaamijkan cusub waxa uu qaxootiga iyo bulshooyinka kale ee taariikh ahaan la takooro u hirgalin doonaa xirfadaha iyo agabka looga baahan yahay joogtaynta, xirfado nololeed oo ku salaysan waaxda gaadiidka. Iyadoo loo marayo barnaamijka TCP, waxaan rajaynaynaa inaan hagaajino deganaanshaha dhaqaalaha ee qaxoontiga iyo qoysaska soo galootiga ah iyo in sidoo kale la taageero baahiyaha shaqaalaha Dekada Seattle, guud ahaan hagaajinta koritaanka labada dhinacba ah iyo barwaaqada Ismaamulka South King.”

“Construct Diversity waxay xiisaynaysaa waxyaabaha ku saabsan Barnaamijka Kor u Qaadista Xirfadaha Maaliyadeed ee SKCCIF, wadashaqayntan muhiimka ah waxay kor u qaadi kartaa awooddeena in aan gaadhno arday badan oo ku nool Ismaamulka South King oo la abuuro fursado xirfado kor u qaadis ah oo la xidhiidha shaqooyinka dekada,” waxa sidaa sheega **Rodell Razor, CEO iyo Asaasaha Construct Diversity**. “Iyadoo loo marayo barnaamijkan, waxaan hiigsaneynaa inaan kordhino haybta iyo kala duwanaanshaha jinsiga anagoo bixinayna latalin iyo tababaro, abuurista fursado iyo xidhiidho awood u siinaya dhalinyarada madow ee Gobolka Greater Puget Sound.”

### Ka faa'idaystayaasha

Marka laga soo tago lixda urur ee helaya maalgelinta wareegga afraad, 17 urur ayaa sii wada shaqada mashaariicda soo kabashada dhaqaalaha ee jira iyada oo loo marayo barnaamijka maalgelinta sannadaha badan.

***Build 2 Lead***
Closing the GAP Barnaamijka (Haysashada Helitaanka Diyaargarowga) waxay la shaqayn doonaan Green River College iyo Highline College in la bixiyo 100 saacadood oo xirfado dhismo ah iyo tababaro fursadaha shaqo, manhajka maaraynta kiisaska, iyo horumarinta qorshayaasha u diyaarsanaanta koolajka dhalinyarada iyo da'yarta ka soo jeeda sib koodhadhka dhaqaale ahaan dhibaataysan.

***Highline College Foundation***
Xarunta Soo Dhawaynta mashruuca Goobta Dhismuhu wuxuu ka taageeri doonaa qaxoontiga kuwaasoo si caalami ah u bartay injineerada dhismaha iyo qaabaynta iyadoo la siinayo liisan ay dib ugu hawlgali karaan, maaraynta kiiska, caawinta

luuqadda, iyo shaqaalaysiinta iyo u gudbinta barnaamijyada tababarada fasalka iyo goobta shaqadaba.

***Wadashaqaynta Emerald Cities***
Kulaylinta, Hawo siinta, iyo Qaboojiyaasha (HVAC) (Akaadamiyada Diyaarinta Xirfadaha iyo Tababarka) waxay ka taageeri doontaa xubnaha aan ku jirin bulshooyinka Ismaamulka South King wacyigalinta, qiimaynta, tababarka, iyo meelaynta tababarada/barnaamijyada carbiska iyo xirfadaha, sida korontada, makaaniga, ganacsiyada la xidhiidha birta.

***International Rescue Committee***
Dariiqyada Xirfadaha Gaadiidka waa barnaamij baladhan oo lagu dhisayo shaqaale gaadiid oo kala duwan kuwaasoo taageeraya hawlaha la xidhiidha dekada isla markaana laga caawinayo qaxoontiga iyo soo galootiga ku sugan Ismaamulka South King si ay u helaan Sharciga Wadista Baabuurta Ganacsiga (CDL), iyo in la siiyo tababarid shaqsi ah, meelayn shaqo, iyo wadashaqaynta barnaamijyada tababarka.

***Construct Diversity***
Barnaamijka Kor u Qaadista Xirfadaha waxay bixin doontaa dariiqyada ganacsiga dhismaha iyada oo loo marayo manhaj dhamaystiran oo loogu talagalay dhalinyarada ka soo jeeda koodhadhka sibka ee dhaqaale ahaan dhibaataysan oo ku salaysan Tusmada Sinnaanta ee Ismaamulka South King. Dhalinyaradu waxay heli doonaan xirfado horumarineed oo aqoon ku dhisan, tababarka u diyaargarowga xirfadaha, tababarada tooska ah ee goobta shaqada, taageerada asxaabta ee ku dhisan shaqooyinka dekada la xidhiidha iyo xirfadaha, kor u qaadista xirfadaha iyadoo loo marayo carbiska ganacsiga dhismaha, tababarada fasalka iyo goobta shaqadaba lagu siinayo, ama shaqaalaysiiyaasha.

***Refugee Women's Alliance***
Dariiqooyinka Xirfadaha Shaqo ee Qaxoontiga iyo Soo Galootiga waxay ka caawin doontaa qaxootiga iyo soo galootiga inay helaan maareynta kiisaska iyo tababarada, waxayna bixiyaan taageero horumarinta xirfadeed si ay u galaan shaqooyinka warshadaha iyo xirfadaha la xidhiidha dakeda.

## Waxyaabaha ku Saabsan Maalgalinta Saamaynta Bulshada Ismaamulka South King

Dakeddu waxay aasaastay SKCCIF 2019 si ay u horumariso wadashaqaynta ku salaysan sinnaanta oo ay u bixiso agab iyo taageero bulshooyinka madaarka diyaaradaha u dhow ee aan taariikh ahaan u adeegin bulshooyinka qowmiyad iyo dhaqan ahaanba kala duwan. Maalgalinta waxa la ansixiyay in lagu abaalmariyo $10 milyan intii u dhaxaysay 2019 ilaa 2023 si wax loogaga qabto horumarinta dhaqaalaha, yaraynta jabaqda aan loo baahnayn, badqabka deegaanka, iyo xasiloonida bulshooyinkan. Komishanka Dekada Seattle wuxuu tixgalin doonaa ogolaanshaha

cusub ee maalgalinta SKCCIF ee maalgalinta mustaqbalka inta lagu jiro 2024. Macluumaadka wareegyada maalgelinta mustaqbalka ayaa la filayaa horraanta 2025.

Tan iyo markii la aasaasay sanduuqa, in ka badan 50 urur ayaa helay SKCCIF $9.25 milyan oo deeq ah oo loogu talagalay in ka badan 80 mashruuc, labadaba iyada oo loo marayo Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaalaha iyo Barnaamijka Deeqaha Deegaanka.

Qaar badan oo ka mid ah Mashaariicda Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaalaha waxay taageeraan kaalmada codsiga shaqada ee bulshooyinka aan loo adeegin iyo kuwa aan Ingiriisiga ku hadlin, qorista barnaamijyada tababarka kahor iyo shaqooyinka adeegayda badda la xidhiidha, inay dhisaan goobo nasasho, nadiif ah goobo dadweyne, iyo ballaadhiinta waxbarashada deegaanka.

Maalgalinta sanadaha badan waxay kordhinaysaa saamaynta maalgalinta bulshada ee Dekada oo waxay ka caawinaysaa inay ka taageerto mashaariicaha joogtaynta qorshaynta iyo hirgalinta. Wareegan inta lagu jiro, ururadu waxay codsan karaan ilaa $100,000 oo loogu talagalay maalgalinta hal sano iyo $250,000 oo ah maagalinta sanadaha badan.

**Dedaalada kooxaha latallinta ku guulaysta 2:1 ee xeerka iswaafajinta**

Ilaa iyo sanadkii 2023, sharciga gobolku wuxuu u baahan yahay in mashruucyadu ay buuxiyaan shuruudaha u dhigma ee 3:1 si ay u helaan lacag. Dhowr sano ayay dekeddu samaysay hindise sharciyeed si loo dhimo shuruudaha 3:1 ee mudnaanta sare leh. Intii lagu jiray 2023 wareegtada sharciga Gobolka Washington, oo ay ku jirto maalgalinta uu bixiyay Xildhibaan Clyde Shavers iyo Xildhibaan Tina Orwall, iyo tallinta uu bixiyay hadda Madaxweynaha Komishanka Dekada Seattle Hamdi Mohamed, Dakeddu waxay si guul leh ugu doodday in la dhimo waafajinta maxalliga ah ee codsadayaasha aan faa'iido doonka ahayn ay tahay inay ku bixiyaan SKCCIF ilaa 2:1. Isbeddelkani waxa uu yareeyaa culayska shuraakada la abaalmariyay waxana uu kor u qaadayaa awoodda Dakeda ee ay kula heshiiso ururada bulshada, kuwa aan faa'iido doonka ahayn, ururada, iyo kooxaha mutadawiciinta ah ee samaynaya horumarinta dadweynaha ee bulshooyinka ku dhow garoonka diyaaradaha.

Dekaddu waxay bixinaysaa dhawr nidaam oo lagu buuxinayo waafajintan, waxa kujira wakhtiyada mutadawacnimada, saacadaha lala xidhiidhayo kasoo qaybgalayaasha xafladaha dadweynaa, saacadaha waxbarashada, saamaynta muddada dheer ee ay dhirtu ku leedahay deegaanka, yaraynta shucaaca kaarboonka, deeqda aan lacagta ahayn, ka qeybqaadashada mashruuca shuraakada, iyo deeqaha lacagta ah.

###

Ku Saabsan Dekada Seattle

Iyadoo lagu aasaasay 1911 codeynta dadka ee ah inay noqoto haayada dawladeed oo gaara, himilada Dekada Seattle waa in kor loo qaado fursadaha dhaqaalaha iyo tayada

nolosha ee gobolka iyadoo loo horumarinaayo ganacsiga, socdaalka, dhaqaalaha, iyo shaqo abuurka qaab siman, isla-xisaabtan leh, oo deegaankana dhowraya.

Dekadu waxay leedahay kuna shaqeysaa Madaarka Caalamiga ee Tacoma ee Seattle (SEA), Qeybta Kalluumaysiga — hoyga qeybta kalluumaysiga Waqooyiga Pacific — iyo ciidanka badda. Dekadu waxay sidoo kale leedahay labo goobood oo maraakiibta ah, goob weyn, hantida maguurtada ah, iyo qeybaha kaargooga badda iyadoo maraysa iskaashigeeda Northwest Seaport Alliance.

Hawl-galada Dekadu waxay caawiyaan ku dhawaad 200,000 shaqo iyo $7 bilyan oo mushahar ah dhamman gobolka. Muddada 13 sano ee xiga, Ajandaha Qarniga ee Dekadu waa inay abuurto 100,000 oo shaqooyin dheeraad ah iyadoo loo maraayo kobcin isla markaana noqonaysa dekada cagaaran ee tamarteedu ku filan tahay dalka oo dhan. Waxbadan ka ogow Wabsaaydka dekada.